# Hagaha dib u warshadeynta

Waxaanu kaydinaa tamar dhan boqolkiiba 60 ilaa iyo 90 ee alaabada dib loo warshadeeyey oo lala barbardhigayo alaabta cusub.

## HARAA WASAQ



Wasaqda haraaga ah waa inlagu tuuraa qashinqubka ee daboolka cagaaran saaran ama weelka qashinka haraaga ah. SAQ



**Wasaqda qatarta ah iyo wasaqda EE waa inaan weligeedba loo xoorin sidii wasaqda haraaga ah.**

**Wasaqda aadka u weyn ee qashin qubka jira waa in loo qaadaa goobta dib u warshadeynta.**

Tusaalooyinka wasaqda haraaga ah:

- Bacaha iyo waraaqaha wasaqda ah
- Waraaqada hadiyada lagu duubo
- Maryaha iyo kabaha
- Koobabka iyo quruuruxda cabitaannada ee jajaban
- Muraayadaha
- Cunto wasaqaysan, hadaadan bacrimeyn
- Waxyaabaha ka kooban alaabo kala duwan
- Bambasta

**Bambasta waa in la qoyaan oo lagu shubaa bac.**

## XAASHI, WARAAQAHA ADAG IYO KAARTOONADA CABITAANKA



Xaashida, waraaqaha adag iyo kaartoonada cabitaanada waa in lagu tuuraa qashin qubka xaashiyaha ama weelka xaashiyaha.



**Kaartoonada cabitaanada waa la raaciyaa biyo qabow loona xiraa lix geesle.**

**Keliya ku rid waraaqaha qalalan.**

**Xaashiyaha wax lagu duubo waa in la dhigaa qashinqubka wasaqda haraaga ah.**

Tusaalooyinka waraaqaha wasaqda:

- Joornaalada
- Jariiradaha
- Buuggaagta tilmaanbixiyaha teleefanada
- Xaashida daabacaada
- Baqshadaha aan daaqadaha laheyn
- Kaartoonada cabitaanka
- Kaartoonada Biisaha

**Kaqeybgalida kaartoonada bakhtiyaa-nasiibka la soo celiyey ee magacaaga iyo teleefan lambarkaaga ku qoran gili kaartoonkaaga lix geeslaha.**

## BAAKADAHA KA SAMAYSAN BALAASTIIKADA



Baakadaha ka samaysan balaastiikada waa in la geeyaa bacaha dib u warshadeynta BIR ama goobaha dib u warshadeynta bacaha.



**Raaci waxyaabaha baakada ka sameysan biyo qabow. Ku dhaaf daboolkooda, waxay keeni karaan daadasho.**

**Uma baahnid inaad ka fujiso xaashida ku kooleysan.**

**Isugu keen bacyaha qashinqubka xaashiyaha.**

Tusaalooyinka baakadaha ka samaysan balaastiikada:

- Dhalooyinka qalka
- Weelasha caanaha dhanaanka ku yimaada
- Weelasha caagada ee oomada waxyaabaha lagu dhaqo ku yimaada
- Baakada hilibka ismariska ku yimaada
- Baakadaha bacaha ka sameysan ee khudaarta miraha leh.
- Bacaha

**Bacaha cusub ee dib loo warshadeyn karo waxaa laga heli karaa suuqyada waaweyn ama goobaha dib u warshadeynta BIR**

## WALXAHA QURUURUX IYO BIRTA KA SAMAYSAN



Quruuruxda iyo walxaha birta iyo baakada ka sameysan waa in loo qaadaa goobta dib u warshadeynta.




**Walxahaasi baakada ka sameysan waa in la raaciyaa biyo qabow ee furka birta ee kor kaga xiran waa in la furaa.**

**Dhooblowga, alaabta dhoobada ka sameysan, alaabta dhalada iyo muraayadaha ka sameysan waa wasaqda haraaga ah. Nalalka la shito waa wasaqda EE.**

Tusaalooyinka quruuruxda iyo biraha ka sameysan:

- Weelka malmalaatada
- Dhalooyinka qamriga
- Shakada kore ee qasacada laga jeexay
- qasacadaha jaandiga
- Dhuumaha burcadka

**Waxaad heli doontaa qariirad ku tusinaysa goobaha dib u warshadeynta BIR ee barta bir.no**

## WASAQDA EE



Wasaqda EE waa in loo geeyaa kuwa ka ganacsada ee noocyada alaabada la midka ah ama goobaha dib u warshadeynta.



**Waxkasta oo u baahan koronto ama batari ku shaqeeya waa wasaqda EE (qashinka korontada ka sameysan).**

Tusaalooyinka wasaqda EE:

- Nalalka la shito*
- Alaabaha carruurta ee korontada ka sameysan
- Kabaha nalka ka baxa
- Teleefanada gacanta
- Batariyada*
- Qalab guriyeedka sida firiijka iyo biyo kululeeyaha

*Waxaa xitaa lasoo gaarsiin karaa sida wasaqda qatarta ah.

**Wasaqda EE waxay ka kooban tahay sumeynta deegaanka sida dhuxusha madow, meerkuri iyo kaadhmiyam.**

## WASAQDA QATARTA AH



Wasaqda qatarta ah waa in la geeyaa mid ka mid ah goobaha lagu ururiyo ee laga helo tiro kaalimaha shidaalka ama goobaha dib u warshadeynta.



**Wasaqda qatarta ah waa in la geeyaa ayagoo xiran, waxaa laga doorbidayaa baakadii ay ku yimaadeen.**

Tusaalooyinka wasaqda qatarta ah:

- Rinjiga, koolada iyo dareeraha alkulada ku milma
- Cayayaan-dile
- Mile/aalkulada cad
- qasacadaha bifbaafka
- Batariyada (noocyada oo dhan)
- Nalalka korontada kaydiya
- Daaqadaha ka kooban PCB
- Asbestos
- Saliid wasaqeysan

**Waxaad heli doontaa qariirad ku tusinaysa goobaha lagu ururiyo wasaqda qatarta ah barta bir.no**